State of Minnesota
County of Hennepin

District Court
4th Judicial District

Lambarka Xeer Ilaalinta 19A13995
Lambarka Dacwadda ee Maxkamadda 27-CR-19-27772

---

**GOBOLKA MINNESOTA )**

Dacweeyaha,

Liddi ku ah

**LEROY DAVANTE DAVIS-MILES** **TAARIIKHDA DHALASHADA: 07/22/1996**

3625 Chicago Ave S
Minneapolis, MN 55407

Eedeysane.

**DACWADDA**

Amarka soo Xiritaanka

[X] Wax laga bedelay

---

Dacwad qoraha waxa uu dacwaddan u soo gudbiyey maxkamadda isaga oo cadeynaya in ay jirto sabab macquul ah oo uu ku rumeysto in eedeysanuhu galay dambiga (dabbiyada):

**DAMBIGA 1**

**Lagu soo eedeeyay: Dil - Darajada 2aad - Aan Bareer Aheyn - Iyada oo la geysanayo fal dambiyeed**
Sharciyada Minnesota: 609.19.2(1), oo lala xiriiriyo: 609.19.2(1)
Ciqaabtiisa ugu badan tahay: 40 SANO xarig ah
Heerka Dambiga: Dambi Culus

Taariikhda Fal Dambiyeedka (dhacay ama qiyaastii): 11/06/2019
Lambarka Taxanaha #(ICR#): 19332972

Faahfaahinta Dambiga:Qiyaastii 11/6/2019 ayaa Degmada Hennepin ee Gobolka Minnesota, LEROY DAVANTE DAVIS-MILES, ayaa isaga oo aan u bareerin inuu dhimashada qof geysto,uu u sabab noqday geerida dhibanaha, qof bini’aadan ah, isaga oo geysanaya faldambiyeed ama isku dayaya inuu geysto fal dambiyeed culus oo ah dagaal Darajada Koowaad ah.

## FAAHFAAHINTA DAMBI KU QAADISTA

Dacwad oogaha oo baaritaan ku sameeyey xaqiiqada iyo sida ay arrintan u dhacday waxa uu aamisan yahay in markii uu xaqiijiyey qodobada soo socda ay jirto sabab dambiga loogu qaado eedeysanaha:

6dii Bishii Nofeembar 2019, qiyaastii 2:45 galabnimo saraakiisha ayaa loo diray in ay u gurmadaan xarunta laga raaco gaadiidka dadweynaha ee Chicago-Lake, Degmada Hennepin, si ay baaritaan ugu sameeyaan weerar gacan ka hadal ah oo halkaas ka dhacay. Markii ay goobta soo gaareen, waxa ay u yimaadeen shan iyo todobaatan jir, dhibanaha, oo yaala waddo lugeedka oo aan dhaqdhaqaaqeyn. Isbitaalka ayaa loo qaaday dhibanaha. Saraakiishu waxa ay ogaadeen in dhibanaha uu dhaawac ka gaaray maskaxda, xaaladiisuna aad u liidatay, oo rajo laga qabin inuu ka kaco.

Saraakiishu waxa ay su’aalo weydiiyeen dhawr qof oo goob joog ahaa waxayna ogaadeen sida soo socota: In nin uu dhibaha feer la dhacay. Ninkaas, iyo dhawr kale oo la socday, waxa ay dul istaageen dhibanaha oo baarteen. Ninka feerka ku dhuftay waxaa marka dambe loo aqoonsaday LEROY DAVANTE DAVIS-MILES, eedeysanaha. Goob joogayasha waxa ay sheegeen in eedeysanuhu feer la dhacay dhibanaha sabab la’aan.

Saraakiishu waxa ay la soo bexeen oo eegeen cajaladda fiidyoowga ee baska iyo xarunta laga raaco gaadiidka dadweynaha. Waxaa fiidyoowga laga arkayey dhibanaha oo raacaya baska. Waxaa sidoo kale fiidyowga laga arkayey eedeysanaha iyo kuwa la socda oo baska soo raacay. Baska oo socda, waxaa la maqlayey dhibanaha oo eedeysanaha iyo kooxda la socota weydiisanaya in ay buuqa yareeyaan. Kooxda eedeysanaha waxa ay colaad u qaadeen dhibanaha iyaga oo ku handaday in ay “garaaci” doonaan haddii uu baska ka dego. Waxaa ka dib fiidiyoowga laga arkayey dhibanaha oo baska kaga dagay Xarunta Gaadiidka Dadweynaha ee Chicago-Lake. Eedeysanaha iyo kooxdii la socotayna way ka soo degeen baska. Waxaa la arkayey dhibanaha oo ku socda waddo lugeedka. Waxaa la arkayey eedeysanaha oo garab socda dhibanaha. Eedeysanuhu waxa uu u soo dhaqaaqay dhibanaha. Halkaas waxaa ay kaameerooyinku tusayaan oo kaliya lugaha dhibanaha iyo eedeysanaha. Waxa la arkayey lugaha eedeysanaha oo u eg in ay u dhaqaaqeen oo u eg in uu feer u tuuray dhinacaha dhibaha. Waxaa la arkayey dhibanaha oo dhulka gadaal gadaal ugu dhacay oo madaxa ku dhufsaday dhinaca waddo lugeedka (marshabiyeediga). Intaas wixii ka dambeeyey dhibanuhu ma laheyn wax dhaqdhaqaaqa ah. Waxaa la arkayey eedeysanaha iyo mid ka mid ah kooxda la socotay oo is gacan qaadaya isuna hambalyeynaya iyada oo dhibanuhu dhulka yaalo oo uusan dhaqdhaqaaqeyn.

Labada kaamaro ee baska iyo tan goobta laga raaco gaadiidka dadweynaha oo dhinacyo kala duwan ka qabanaya, waxa ay saraakiishu aqoosan kareen wajiga edeysanaha iyaga oo si gaar ah ugu fiirsaday dharka uu xirnaa oo ay ka mid ahaayeen jaakad, surwaalka,kabaha, iyo waxyaabo gacanta ugu xirnaa.

Waxa ay saraakiishu sawir ka sameeyeen muuqaalka eedeysanaha ee fiidiyowga aan soo xusnay. Waxaa la adeegsaday barnaamij lagu aqoonsado wajiyada kaasoo lagu ogaaday eedeysanaha la tuhunsan yahay. Saraakiishu waxa ay soo qaadeen sawirka eedeysanaha oo horey loo qaaday oo ay u barbardhigeen sawirka laga sameeyey fiidiyowga, iyaga oo si gaar ah ugu fiirsaday muuqaalka sawirka horey loo qaaday la mid yahay kuwa laga soo qaaday fiidiyoowga.

Saraakiishu waxa ay gacanta ku dhigeen oo soo xireen eedeysanaha. Waxaa la fuliyey amar maxkamadeed oo saraakiisha u ogolaanaya in ay baaraan guriga eedeysanaha si ay gacanta ugu dhigaan jaakaddii, surwaalkii iyo kabihii uu xirnaa eedeysanaha ee lagu arkay fiidyowga. Dharkaas waxaa laga helay meelaha lagu aqoonsaday eedeysanaha. Markii la soo qabtay eedeysanaha, waxaa gacanta ugu xirnaa mid la mid ah waxyaabihii ugu xirnaa gacanta ee lagu arkay fiidiyoowga.

MACIUUMAAD DHEERAAD AH: 12Kii Nofeembar 2019 waxaa saraakiisha la soo wargeliyey inuu dhibanaha u geeriyooday dhawaca uu u geystay eedeysanaha. Meydka dhibanaha waxaa loo qaaday Meyd Baaraha Degmada Hennepin si uu baaritaan ugu sameeyo.

Waxaa dhameystir lagu sameeyey dacwadda si loogu daro dambi dheeraad ah oo ah Dil Darajada Labaad. Xilligan, eedeysanuhu waxaa lagu hayaa xabsiga.

## SAXIIXA IYO OGOLAASHAHA

Waxa uu dacwad qoruhu codsanayaa in si eedeysanaha dusha laga saaro damaanad ama shuruudo lagu xiro:
(1) La soo xiro ama la qaado talaabooyin lagu xaqiijinayo in eedeysanaha maxkamadda la hor keeno,
(2) ama la hayo, haddii horay loo xiray, ilaa dhageysiga maxkamadda, ama eedeysanaha loola dhaqmo sida uu dhigayo sharciga.

Dacwad qoruhu waxa uu cadeynayaa isaga oo ogsoon ciqaabta uu ku mudan karo been ka sheegidda qoraalkan, in waxyaabaha uu ku sheegay qoraalkan ay run iyo sax yihiin. Sharciga Minnesota. § 358.116; Minn. R. Crim. P. 2.01, subds. 1, 2.

**Dacwad Qoraha**

Chris Thomsen
Sadex
Xarigle 350
S 5th St
Minneapolis, MN 55415-1389
Aqoonsi: 7201

Oo ku saxiixay kombiyuutarka:
11/12/2019 03:20 PM
Degmadaha Hennepin, Minnesota

Xeer Ilaalinta awoodda u leh dacwad ku oogidda dambiyada la geystay, waxa aan ogolaaday qoraalka dacwadda.

**Xeer Ilaalinta**

Darren Borg
300 S 6th St
Minneapolis, MN 55487
(612) 348-5550

Ku Saxiixay Kombiyuutarka:
11/12/2019 03:10 PM

## WAXYAABAHA KU XUSAN FAAHFAAHINTA DAWADA

Iyadoo lagu saleynayo xaqiiqada kor ku xusan, iyo cadeymaha taageeraya iyo qoraalada marag kaca ee dheeraadka, anigoo ah, sarkaalka soo saaray, waxa aan ogaaday in ay jirto sabab macquul ah oo taageereysa, in sii deynta eedeysanaha lagu xiro lacag damaanad ah, la soo xiro eedeysanaha ama la qaadayo talaabooyin kale oo xagga sharciga ah oo lagu xaqiijinayo in eedeysanaha cadaaladda la hor keeno, ama xabsiga lagu sii hayo eedeysanaha, haddii uu xiran yahay, ilaa dhageysiga maxkamadda. Eedeysanaha waxaa lagu soo eedeeyey dambiyada kor ku xusan.

### ☐ MAXKAMAD UGA YEERIS

SIDAA DARTEED, WAXAA EEDEYSANAHA LA WARGELINAYAA INUU HOR YIMAADO ___,_______ee
________________________________________AROORNIMO/GALABNIMO.

Maxkamadda kor ku xusan cinwaankeeduna ku qoran yahay ee ku lifaaqan maxkamad uga yeerista si aad dawcwaddan uga jawaabto.

HADDII AAD KA MAQNAATO DHAGEYSIGA MAXKAMADDA, si aad uga jawaabto MAXKAMAD UGA YEERISTA, AMAR LAGUGU SOO XIRO AYEY maxkamaddu soo saareysaa.

### ☐ AMAR XIRITAAN AH

Ciidamada nabadgelyada ee degmada kor ku xusan ama cid kasta oo awood u leh fulinta amarka xiritaanka: Waxa aan farayaa aniga oo ku hadlaya magaca gobolka Minnesota, in gacanta lagu soo dhigo eedeysanaha oo la xiro markiiba lana hor keeno maxkamadda (haddii ay shaqeyneyso) oo haddii aanay shaqayneyn, la hor keeno Qaali sida ugu dhaqsaha badan, muddo ku siman 36 saacadood gudahood marka la soo xiro sida uu dhigayo sharciga.

☐ ***Waxaa laga fulinayaa xuduudda MN kaliya***

☐ ***Waxaa laga fulinayaa Waddanka oo dhan***

☐ ***Waxaa laga fulinayaa gobolada xuduudda nala leh***

### ☒ AMAR XABSI KU HEYN

Maadaama eedeysanaha xabsiga lagu hayo, waxa aan farayaa, in sii deyntiisa lagu xiro damaanad iyo shurduudo, xabsigana lagu sii hayo ilaa dhageysiga maxkamadda laga qabanayo.

Damaanad: $500 000,00
Shuruudaha sii Deynta:

Qoraha dacwada, ayaa soo saaray isaga oo ku dhaaranaya inuu ka run sheegay dhacdooyinka isaga oo ogsoon cawaaqibta uu ku mudan karo been ka sheegista dhacdooyinka uu hor keenay Qaaliga ee hoos ku saxiixan taariikhda: 12ka Nofeembar 2019.

| | | |
|---|---|---|
| **Qaaliga** | Jamie L Anderson<br>Qaaliga Degmada | Ku Saxiixay Kombiyuutarka: 2019-11-12 15:26 |

Sarkaalka waxaa lagu hor dhaariyey Qaaliga iyada oo goob joog ay ka yihiin:

**DEGMADA HENNEPIN EE GOBOLKA MINNESOTA**

**GOBOLKA MINNESOTA**

Dacweeye (dawladda)

lidd ku ah

**LEROY DAVANTE DAVIS-MILES**

Eedeysane.

*CIIDAMADA NABADGELYADA EE XAQIIJINTA GAARSIINTA EEDEYSANAHA*

*Waxa aan cadeynayaa in aan gaarsiiyey nuqul ka mid ah Amarka Xabsi Ku Heynta eedeysanaha kor ku xusan.*

Saxiixa Sarkaalka:

# SHARCIYADA LOO CUSKADAY IYO XAJMIGA DAMBIGA

**Magac:** LEROY DAVANTE DAVIS-MILES

**TAARIIKHDA DHALASHADA:** 07/22/1996

**Cinwaanka:** 3625 Chicago Ave S
Minneapolis, MN 55407

**Magac kale oo loo yaqaan/Taariikh dhalasho**

**SID:** MN14HC9151

**Dhereka:**

**Miisaanka:**

**Midabka Indhaha:**

**MidabkaTimaha:**

**Jinsiga:** MALE

**Qowmiyadda** Madow

**Sawir Faraha Laga Qaado Sida Sharcigu Dhigayo:** Haa

**Sawirka faraha waxaa laga helay Diiwaanka**

**Fal Dambiyeedka:** Haa **Leesin Lambarka #:**

**Aqoonsiga SILS #:** 768262

**SILS Lambarka Taxanaha.** 3138920

**Khamriga Jirka Ku Jira:**

| Lambar Taxane | Qodobka Shariciga Nooca | Dambiga Taariikhda: | Qodobada Sharciga iyo Faahfaahin | Dambiga Heerka | MOC | GOC | Aasaasiga Ah Hay'adaha kala duwan | Lambarka Dacwadda |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Lagu soo eedeeyay: | 2019-11-06 | 609,1921<br>Dil - Darajada 2aad - Aan Bareer Aheyn - Iyada oo la geysanayo fal dambiyeed | Dambi Culus | H2853 | | MN0271100 | 19332972 |
| | Ciqaabta | 2019-11-06 | 609,1921<br>Dil - Darajada 2aad - Aan Bareer Aheyn - Iyada oo la geysanayo fal dambiyeed | Dambi Culus | H2853 | | MN0271100 | 19332972 |